

Barnaamij cusub oo u oggolaanaya shaqaalaha Oregon inay qaataan fasax lacag ah qaar ka mid ah waqtiyada aadka muhiimka ugu ah nolasha ee saameynaya qoysaskeena, caafimaadkeena iyo badqabkeena.

Yaa loo aqoonsan yahay shaqo-bixiyeyaasha yar-yar ee loogu talagalay barnaamijka Fasaxa Lacag bixinta ee Oregon?

Shaqo-bixiyaha yar wuxuu leeyahay in ka yar 25 shaqaale.

Shaqo-bixiyeyaasha yar-yar ma ku jiraan fasaxa lacag bixinta?

Haa, fasaxa lacag bixinta Oregon wuxuu daboolaa dhammaan shaqo-bixiyeyaasha oo dhan- yar iyo weyn - iyo shaqaalahooda.

Shaqo-bixiyeyaasha yar-yar ma laga raba inay bixiyaan qaaraanka?

Tabarucaadka waxaa bixiya shaqaalaha (60%) iyo shaqo-bixiyeyaasha (40). Shaqo-bixiyeyaashayar-yar loogama baahna inay bixiyaan qaybta shaqo-bixiyaha (40%) ee tabarucaadka, balse taas ay tahay waa inay hayaan oo ku soo gudbiyaan qaybta tabarucaadka ee shaqaalaha warbixintooda mushaar bixinta.

Waa maxay ilaalinada shaqada ay tahay inay bixiyaan shaqo-bixiyeyaasha yar-yar?

Si la mid ah shaqo-bixiyeyaasha oo dhan, shaqo-bixiyeyaasha yar-yarwaa inay ku soo celiyaan shaqaalaha fasaxa lacag bixintaqaatay ku laabtaan shaqadii ay hayeen haddii ay weli jirto. Haddii shaqadii ay hayeen aysan dib dambe u jirin, shaqo-bixiyaha wuxuu dooran karaa inuu shaqaalaha ku meeleyo shaqo kale oo leh waajibaad isku mid ah oo isla mushaarkii ah.

Shaqaaalehee ayaa lagu tiriyaa 25-ta shaqaale? Waxaan u isticmaali doonaa warbixinnada mushaar bixinta xisaabinta tirada shaqaalaha si aan u go'aamino tirada shaqaalaha ee shaqo-bixiyaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha shaqeeya waqti-buuxa, waqti-dhiman, shaqaale xilliyeedka, iyo shaqaalaha kumeelgaarka ah, iyo sidoo kale shaqaalaha ka shaqeeya meel ka baxsan gobolka. Kaliya shaqaalaha loo shaqaaleysiiyo inay beddelaan shaqaalaha qaadanaya fasaxa lacagta bixinta ayaa laga saarayaa tirinta.

Sidee loo go'aamin doonaa tirada shaqaalaha ee shaqo-bixiyaha marka tabarucaadkabilaabmayo gudaha Janaayo 2023?

Dhammaan shaqo-bixiyeyaasha leh 25 shaqaale leh ama ka badan ayaa bilaabi doonaan bixinta tabarucaadkagudaha Janaayo 2023. Shaqo-bixiyeyaasha waxay go'aamiyaan tirada shaqaalahooda iyagoo xisaabinaya tirada shaqaalaha (oo ay ku jiraan kuwa ku sugan gudaha iyo dibadda Oregon). Shaqo-bixiyeyaasha aan hubin tirada shaqaalaha waxay gees u dhigi karaan tabarucashaqo-bixiyaha. OED waxay isticmaali doonaan warbixinnada mushaar bixinta ee shaqo-bixiyaha laga bilaabo Janaayo-Maarsi 2023 (Rubuca 1) si ay u gaaraan go'aan rasmi ah waxayna ogeysiin doonaan shaqo-bixiyaha ugu dambeyn bisha Juun haddii ay tahay inay bixiyaan biirtada. Shaqo-bixiyeyaashu waxay ka heli doonaan tilmaamo faahfaahsan hagaha warbixinta mushaarka ee la isku daray ee soo socda iyo sidoo kale buugga hagaha shaqo-bixiyaha ee soo socda.

Sidee loo go'aamiyaa tirada shaqaalaha ee shaqo-bixiyaha sannad walba kadib 2023?

Sannad kasta, waxaan xisaabin doonaa tirada guud ee shaqaalaha rubuc sannadeed kasta kadibna waxaan xisaabin doonaa celceliska afar rubuc sannadeed. Nofeembar kasta, waxaan ogeysiin doonaa shaqo-bixiyeyaasha tirada shaqaalaha ee shaqo-bixiyaha ee sannadka soo socda.

Fasaxa Lacageed ee Oregon miyuu tiriyaa shaqaalaha isla sida Xeerka Fasaxa Qoyska ee Oregon (OFLA)? Haddii shaqo-bixiye uusan caymis ka haysan OFLA, miyaa weli loo tixgeliyaa shaqo-bixiye yar o oleh Fasaxa Lacag bixinta ah ee Oregon? Waxaa jira farqi weyn oo u dhexeeya sida OFLA iyo lacag bixinta fasaxa Oregon ay u go'aamiyaan tirada shaqo-bixiyaha. Caymiska OFLA micno ma samaynayo marka la go'aaminayo tirada shaqo-bixiyaha ee Fasaxa Lacag Bixinta ah ee Oregon.

	Fasaxa Lacag Bixinta Oregon	OFLA
Shaqo-bixiyayaasha yaryar ma caymiyaan?	Haa, balse shaqo-bixiyayaasha yar-yar ma bixiyaan tabarucaadka shaqo-bixiyaha	Maya
Waa maxay shaqo-bixiye shaqaale yar leh?	In ka yar 25 shaqaale ah	In ka yar 25 shaqaale ah
Yaa loo tixgeliyaa shaqaale?	Dhammaan shaqaalaha ka shaqeeya gudaha iyo dibadda Oregon	Dhammaan shaqaalaha ka shaqeeya gudaha Oregon
Sidee loo go'aamiyaa tirada?	Celceliska tirada shaqaalaha ee rubuc-biloodlaha sannadkii hore	Haddii 25 ama in ka badan oo qof la shaqaaleysiiyay muddo 20 maalmaha shaqada ah ama ka badan intii lagu gudajiray mid kasta oo ka mid ah 20 isbuuc shaqeed ee sannadka lagu jiro ama sannadkii hore

Ma jirtaa taageero loogu talagalay shaqo-bixiyayaasha yar-yar leh marka shaqaalahoodu qaataan fasax mushaar leh?

Haa. Shaqo-bixiyayaasha yar-yar ee oggolaada inuu bixiyo qayb ka mid ah tabarucaada loo shaqeeyaha waxay heli karaan deeqo caawimaad ah si ay gacan uga geystaan kharashaadka shaqaaleysiinta shaqaalaha beddelka ah ama kharashaadka kale ee muhiimka ah ee la xiriira mushaarka.

Lacag intee le'eg ayaa laga heli karaa deeqaha kaalmada ah? Ilaa \$3,000 shaqaale kasta oo fasax qaata, ilaa \$30,000 sannad kasta.

Waa maxay noocyada deeqaha kaalmada ah?

Deeqaha soo socda ayaa la heli karaa:



\$3,000 si loo shaqaaleysiiyo shaqaale beddel ah.



\$1,000 kharashaadka la xiriira mushaarka, sida saacadaha dheeraadka ah ama kharashaadka tababarka.

Waa maxay shuruudaha lagu helo deeqda? Si loo helo deeq, shaqo-bixiyayaasha yar-yarwaa inay ka go'aan tahay inay bixiyaan tabarucaadka shaqo-bixiyaha (40% sicirka guud) ugu yaraan siddeed rubuc sannadeed kadib markay helaan deeqda. Waa inay buuxiyaan codsi oo ay soo gudbiyaan dukumeenti sheegaya in shaqaale beddel ah la shaqaaleysiiyay ama la galay kharashaad la xiriira mushaarka la galay.

Shaqo-bixiyayaasha ma laga rabaa inay dib u bixiyaan deeqaha?

Shaqo-bixiyayaashu waa inay dib u bixiyaan deeqaha hadduu jiro wax ka beddel lagu sameeyay tirada shaqaalaha ee shaqo-bixiyaha oo aysan imminka u qalmin deeqda inay heleen.